# Ilaalinta Xuquuqda Shaqaalaha Aabka (Shaqaalaha Oonleenka Ku shaqeeyaan)

Seattle Office of Labor Standards

**Shaqaalaha Abku waxay leeyihiin Xuquuq!**

Ma u adeegsataa taleefanka ama kumbuyuutarka si aad uga shaqeyso gudaha Seattle? Waxaa ku difaaci kara sharciyada shaqaalaha ee shaqaalaha ka shaqeeya abka ee Seattle.

Seattle waxay leedahay sadex sharci oo difaacaaya shaqaalaha abka ka shaqeeya. Sharciyadaan ayaa qabanaaya inta badan laakiin maaha dhammaan ababka. Si aad u hesho xog dheeri ah oo ku aadan in sharciyadaan ay daboolayaan shaqadaada iyo in kale booqo: seattle.gov/app-based-worker-ordinances

Marka koobaad, sharciga Mushaarka ugu yar ee Shaqaalaha Abka ayaa ka doonaaya shirkada abka inay ku siiso mushaarka ugu yar shaqo kasta ama adeeg kasta oo aad qabato haddii qayb kamid ah shaqadaas lagu qabto gudaha xuduudaha Magaallada Seattle. Mushaarka ugu yar waxaa ku jira wakhtiga aad ku bixiso shaqada iyo inta mayl ee aad u safartay si aad u samayso shaqada.

Marka labaad, sharciga Fasaxa Mushaarka leh ee Qofka jiran iyo Fasaxa Badbaadada ee Shaqaalaha abka ka Shaqeeya ayaa ka doonaaya shirkada abka inay ku siiso wakhtiga fasaxa mushaarka leh ee qofka jiran ama arimaha badqabku haystaan sida rabshada qoyska. Waxaad helaysaa hal maalin oo wakhtiga fasaxa mushaarka leh ee jirada iyo badbaadada 30 maalmood kasta oo aad ka dhex shaqeyso Seattle kuwaasoo ay ku jiraan maalmaha aad dadka ka qaado aadna dadka gayso goobaha gudaha Seattle ah.

Laga bilaabo janaayo 2025, sharciga sadexaad, Xeerka Xuquuqda Shaqo Ka joojinta Shaqaalaha Abka, ayaa dhaqan galaaya. Sharcigaan ayaa qabanaaya abab ka badan intay qabanayeen labada sharci ee hore, marka xataa haddii aysan ku daboolayn sharciyada kale, waxaad heli kartaa xuquuqda shaqo ka joojinta.

Sida ku cad sharcigaan, inta badan shirkadaha ku shaqeeya abka waa inay ku siiyaan xog qoraal ah kahor inta aysan shaqada kaa joojin (aysan kaa xirin adeegsiga abka si aad ugu shaqeyso ama aysan dhimin adeegsigaaga abka). Wuxuuna sharcigu sidoo kale sababaha shaqo ka joojinta qaarkood u aqoonsanayaa sharci daro.

Shirkadu waa inay kuugu sheegto qaab qoraal ah:

Noocyada xeerarka, haddii la jebiyay, u fasaxaaya shirkada inay kaa xirto ama kaa xadido adeegsiga abka.

Haddii shaqada lagaa joojinaayo:
- Sababta shaqada lagaaga joojinaayo
- Nooca xogta shirkadu u adeegsatay gaarista go'aankeeda shaqo joojintaada (shirkadu waa inay ku siisaa nuqullada diiwaanno kasta) iyo
- Sida aad uga doodi karto shaqo ka joojinta

Shirkadu waa inay ku siisaa digniin ku aadan shaqo ka joojintaada ugu yaraan 14 maalmood kahor inta aysan kaa xirin ama kaa xadidin adeegsiga abka. Laakiin, haddii shirkadu ay kuu sheegto in aad, tusaale ahaan, u gacan qaaday macmiil, shirkada ayaa shaqada kaa joojin karta isla markaba. Waxaa jira sababo kale oo shirkadu shaqada kaaga joojin karto isla markaba sidoo kale. Shirkadu waa inay kuu sheegtaa sabbta shaqada lagaaga joojinaayo iyo sida aad uga doodi karto shaqo ka joojin sabab kasta oo la cuskadayba. Haddii aad diido shaqo ka joojinta, shirkadu waa inay ka jawaabto doodaada 14 maalmood gudahood ama kuu sharaxdaa dib u dhacyo kasta oo yimaada.

Haddii shirkadu aysan ku siin xogtaan, waxaad la hadli kartaa Seattle Office of Labor Standards ama OLS si aad u aragto haddii Xafiisku ku caawin karo. Aad ayay muhiim u tahay in aad adeegsato nidaamka shirkada si aad uga doodo shaqo joojinta, ama haddii kale waxaad luminaysaa xuquuqdaada dooda. Shirkadu waa inay ku siisaa 90 maalmood oo aad dood uga keento shaqo ka joojinta laga bilaabo taariikhda aad heshay ogeysiiska koobaad ee ah in shaqada lagaa joojiyay.

Sharcigaan ayaa ka dhigaaya sharci daro in shaqada lagaaga joojiyo sababaha qaar sida: cadadka wakhtiga lagu heli karo inaad shaqeyso, go'aankaaga la xiriira aqbalaada dalabaadka ama diidista dalabaadka, inaad iskudayday inaad shirkada la hadasho, ka hadalka xaaladaha shaqada ee shirkada, adeegsiga xuquuqdaada sharciga ah, iyo waxyaabo kale. Tusaale, haddii aad diido dalabyo badan oo xiriir ah sabab la xiriirta in aadan dooneyn inaad dad qaado, shirkadu kaagama saari karto shaqada sababtaas awgeed.

Laga bilaabo Juun 1, 2027, OLS ayaa sidoo kale eegi karta sababaha shirkadu shaqada kaaga saartay si loo hubiyo haddii talaabada shirkadu sharci tahay. Kajor Juun 1, 2027, OLS ayaa keliya eegi kara in shirkadu u dhaqantay hanaanka ilaalinta xuquuqda si ay shaqada kaaga saarto ama haddii shirkadu ay talaabo xun oo kaa dhan ah qaado ayadoo ku saleynaysa inaad ku dhaqantay xuquuqdaada (waxaan tan ugu yeernaa aargoosi).

Seattle ayaan lahayn sharciyo shaqeynaaya oo la xiriira u shaqeynta shirkadaha tagaasida (marka aad gaari u adeegsato soo qaadista iyo gaynta dadka, laakiin aadan bixinin adeegyada kale ama aadan samayn dalab gaynta). Gobalka Washington wuxuu leeyahay sharciyo ku siinaaya xuquuqaha shaqada tagaasida.

**Haddii aad qabto su'aalo ama aad aaminsan tahay in shirkada aad u shaqeyso aysan ku dhaqmayn sharciyadaan, waxaad la xiriiri kartaa OLS adoo wacaaya 206-256-5297 ama booqanaaya www.seattle.gov/laborstandards/investigations/file-a-complaint**

**OLS ayaa bixin kara tujumaad iyo fasiraada luuqada. Adeegyadu waa bilaash waana qarsoodi. Xafiisku kuma waydiin doona xaaladaada soo galootinimada.**